

XAASHIDA XAQIIQDA HELAYAASHA IYO DARYEELAYAASHA

OGGOLAANSHAHA ISTICMAALKA XAALADDA GURMADKA AH EE TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH SI LOOGA HORTAGO CUDURKA KORONAFAYRAS 2019 (COVID-19) EE SHAKHSIYAADKA DA'DOODU TAHAY 16 IYO KA WAYN

Waxa lagu soo bandhigay Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech si looga hortago Cudurka Koronafayras ee 2019 (COVID-19) oo uu keeno SARS-CoV-2. Xaashidan Xaqiiqda waxa ku qoran macluumaad kaa caawinaya inaad fahamto halisaha iyo faa'idooyinka Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, kaasi oo laga yaabo inaad qaadato maadaama uu hadda jiro aafada COVID-19.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa tallaalka waxaanu kaa baajin karaa inaad qaaddo COVID-19. Ma jiro tallaalka Maamulka Cuntada iyo Daawada ee Maraykanku ansixiyey oo lagaga hortago COVID-19.

Ka akhri Xaashidan Xaqiiqda macluumaad kusaabsan Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Kala hadal bixiyaha tallaalka haddii aad su'aalo qabto. Adiga ayaa go'aanka leh inaad qaadato Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waxa la qaataa laba marqaadasho oo isku xiga, oo 3 toddobaad u dhaxayso, waxaana laga qaataa muruqa.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waxa dhici karta inaanu difaacin cid kasta.

Xaashidan Xaqiiqda waxa dhici karta in wax laga baddalo. Xaashidii Xaqiiqda ee ugu dambaysay, fadlan fiiri www.cvdvaccine.com.

WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO KAHOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKAN

WAA MAXAY COVID-19?

COVID-19 waa cudur uu keeno koronafayraska loo yaqaan SARS-CoV-2. Noocan koronafayraska waligii hore looma arag. Waxaad ku qaadi kartaa COVID-19 inaad isa soo gaartaan qof kale oo fayraska sida. Inta ugu badan waa xanuun neefmareenka ku dhaca oo saamaynna ku yaalan kara xubno kale. Dadka qaba COVID-19 waxay leeyihiin astaamo fara badan, laga bilaabo astaamo fudud ilaa xanuunsi daran. Astaamuhu waxa dhici karta inay soo ifbaxaan 2 ilaa 14 maalmood kadib marka qofku u baylaho fayraska. Astaamaha waxa kujiri kara: xummad ama qarqaryo; qufac; neefta oo qofka qabata; daal; xanuun muruqyada ama jirka ah; madaxanuun; dhadhanka ama urta oo qofka ka tagta; cune xanuun; cabbur ama duuf; yalaalugo ama matag; shuban.

WAA MAXAY TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa tallaalka aan la ansixin oo ka hortagi kara COVID-19. Ma jiro tallaalka FDA (Food and Drug Administration) ansixisay oo baajinaya COVID-19.

FDA waxay oggolaatay isticmaalka xaaladda gurmada degdega ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech si looga hortago COVID-19 ee shakhsiyadka da'doodu tahay 16 jir iyo ka wayn iyadoo la raacayo nidaamka Oggolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Gurmada ah (Emergency Use Authorization (EUA)).

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan EUA, fiiri "**Waa maxay Isticmaalka Xaaladda Gurmada ah (EUA)?**" qaybta ah oo ku taalla dhammaadka Xaashidan Xaqiiqda.

MAXAY TAHAY INAAD U SHEEGTO BIXIYAHA TALLAALKAAGA KAHOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

U sheeg bixiyaha tallaalka dhammaan xaaladahaaga caafimaad, oo ay kujiraan haddii aad:

- leedahay xasaasiyado
- leedahay xummad
- aad leedahay xaalad dhiigbax ama aad qaadato maaddooyinka dhiigga khafiifiya
- uu difaacaaga jidhku liito ama aad qaadato daawo saamayn ku yeelata habdhiskaaga difaaca
- aad uur leedahay ama qorshaynayso inaad uur yeelato
- aad naaska nuujinayso
- aad qaadatay tallaalka COVID-19

AYAA QAADANAYA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

FDA waa oggolaatay isticmaalka xaaladda gurmada ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech ee shakhsiyadka da'doodu tahay 16 iyo ka wayn.

AYAAN QAADANAYN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Waa inaad qaadan Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech haddii aad:

- leedahay xasaasiyad leedahay xasaasiyad kadib marqaadashadii hore ee
- daran tallaalkan
- leedahay xasaasiyad ku leedahay xasaasiyad waxyaalaha uu ka kooban
- daran yahay.

WAA MAXAY WAXYAABAHA UU KA KOOBAN YAHAY TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-Biontech waxa kujira waxyaalaha soo socda: mRNA, lipids ((4-hydroxybutyl)azanediy)bis(hexane-6,1-diy)bis(2-hexyldecanoate), 2 [(polyethylene glycol)-2000]-N,N-ditetradecylacetamide, 1,2-Distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine, and cholesterol), potassium chloride, monobasic potassium phosphate, sodium chloride, dibasic sodium phosphate dihydrate, iyo sucrose.

SIDEE TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH LOO BIXIYAA?

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waxa lagaa siin doonaa muruqa isagoo irbad ah.

Taxanaha tallaalka ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa 2 marqaadasho oo 3 toddobaad u dhaxayso.

Haddii aad qaadato hal marqaadasho Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, waa inaad qaadato marqaadasho labaad oo isla tallaalkan ah 3 toddobaad kadib si loo dhammaystiro taxanaha tallaalka.

MIYAA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH HORE LOO ISTICMAALAY?

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waa tallaalka aan la ansixin. Tijaabooyinka caafimaad, ugu dhawaan 20,000 oo qof oo da'doodu tahay 16 jir iyo ka wayn ayaa qaatay ugu yaraan 1 marqaadasho oo ah Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech.

WAA MAXAY FAA'IDOOYINKA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Tijaabo caafimaad oo joogto ah kadib, Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waxa la ogaaday inuu ka hortagayo COVID-19 kadib marka qofku qaato 2 marqaadasho oo 3 toddobaad u dhaxayso. Muddada ay soconayso difaaca ka dhanka ah COVID-19 hadda lama oga.

WAA MAXAY HALISAHA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Saamaynaha xun ee laga soo sheegay inuu leeyahay Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech waxa kamid ah:

- xanuun meesha qofka laga mudo/duro
- daal
- Madaxanuun
- murqo xanuun
- qarqaryo
- kala-goysyo xanuun
- xummad
- barar meesha qofka laga mudo
- casaan meesha qofka laga mudo
- yalaalugo
- juucjuuc
- qanjaha (lymph nodes) oo barara (lymphadenopathy)

Fursadda uu Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ku keeni karo xasaasiyado daran aad ayey u yar tahay. Xasaasiyadaha daran waxay sida badan ku dhacaan dhawr daqiiqo ilaa hal saac gudahood kadib marka qofku qaato Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Sababtan darteed, bixiyahaaga tallaalku wuxuu kaa codsan karaa inaad joogto goobta aad tallaalka ka qaadatay si xaaladdaada loola socdo tallaalka kadib. Astamaha xasaasiyadaha daran waxa kamid noqon kara:

- Neefsiga oo qofka ku adkaada
- Barar wejiga iyo cunahaaga
- Garaaca wadnaha oo kordha
- Finan yaryar oo jidkaaga oo dhan ka soo baxa
- Dawakhaad iyo daciifnimo

Kuwani waxa dhici karta inayna noqon dhammaan saamaynaha xun ee iman kara ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Saamayno xun oo halis ah oo aan la filayn ayaa iman kara. Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech wali wuxuu ku jiraa tijaabooyin caafimaad.

MAXAY TAHAY INAAN KA QABTO SAAMAYNAHA XUN?

Haddii aad la kulanto xasaasiyado daran, wac 9-1-1, ama tag isbitaalka kuugu dhaw.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad yeelato saamayno xun oo ku dhibaya ama kaa tagi waaya.

Buuxi oo ugu gudbi warbixinaha VAERS onlayn ahaan <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Si aad u hesho kaalmo dheeraad ah warbixinta u gudbinta VAERS wac 1-800-822-7967. Fadlan ku dar “Pfizer-BioNTech COVID-19 Vaccine EUA” sadarka koowaad ee #18 ee foomka warbixinta.

Sidoo kale, waxaad ugu gudbin kartaa saamaynaha xun ee daawada Pfizer Inc. macluumaadka xiriirka ee hoose.

Websayt	Lambarka faakiska	Lambarka taleefanka
www.pfizersafetyreporting.com	1-866-635-8337	1-800-438-1985

Sidoo kale waxa lagu siin karaa ikhtiyaarka inaad iska diiwaangaliso v-safe. V-safe waa barnaamij taleefanka casriga ah ku shaqeeya oo cusub oo bilaa lacag ah kaasi oo isticmaala farriimaha qoraalka ah iyo xogururinaha webka si xog looga doono dadka tallaalka qaatay si loo aqoonsado saamaynaha xun ee ku iman kara kadib COVID-19 tallaalkiisa. V-safe wuxuu qofka waydiiyaa su'aalo ka caawinaya CDC inay la socoto badbaadada tallaalkada COVID-19. V-safe sidoo kale waxay bixisaa xasuusiyayaasha marqaadashada labaad haddii loo baahdo iyo la-socod taleefan oo toos ah oo CDC samaynayo haddii kaqaybqaatayaashu soo sheegaan saamayn caafimaad oo wayn kadib qaadashada tallaalka COVID-19. Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan sida la isku diiwaangaliyo, booqo: www.cdc.gov/vsafe.

KA WARAN HADDII AAN GO'AANSADO INAANAN QAADANIN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Adiga ayaa go'aanka leh inaad qaadato iyo inaad qaadatid Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Haddii aad go'aansato inaad qaadatid, wax isbaddal ah ku imaan maayo daryeelkaaga caafimaad ee caadiga ah.

MIYEEY JIRaan IKHTIYAARO KALE OO LAGAGA HORTAGO COVID-19 OO AAN KA AHAYN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH?

Wakhtigan, ma jiro tallaalka kale oo la ansixisay oo diyaar ah kaasi oo lagaga hortagi karo COVID-19. Tallaaladeena kale ee lagaga hortagayo COVID-19 waxa lagu heli karaa xaaladda Oggolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Gurmada ah.

MA LA QAADAN KARAA TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH TALLAALO KALE?

Ma jirto macluumaad laga hayo oo ku aaddan la isticmaalka Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech tallaalo kale.

KA WARAN HADDII AAN UUR LEEYAHAY AMA NAASNUUJINAYO?

Haddii aad uur leedahay ama naasnuujinayso, kala hadal waxyaalaha kuu bannaan bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

MIYAAN TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH KA QAADI DOONAA COVID-19?

Maya. Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech kuma jiro SARS-CoV-2 kamana qaadi kartid COVID-19.


HAYSO KAARKAAGA TALLAALKA

Markii aad hesho marqaadashadaada koowaad, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka si uu kuugu muujiyo marka aad ku laabanayso marqaadashada labaad ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Xasuusnaw inaad kaarkaaga soo qaadato markii aad soo laabanayso.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddii aad su'aalo qabto, booqo websaytka ama wac lambarka taleefanka ee hoos ku qoran.

Si aad u hesho Xaashida Xaqiiqda ee ugu dambaysay, fadlan sawir QR code-ka hoos ku yaala.

Websaytka guud	Lambarka taleefanka
<p>www.cvdvaccine.com</p> 	<p>1-877-829-2619 (1-877-VAX-CO19)</p>

SIDEEN WAX BADAN KU OGAAN KARAA?

- Waydii bixiyaha tallaalka.
- Booqo CDC <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>.
- Booqo FDA <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>.
- La xiriir waaxda caafimaadka dadwaynaha ee gobolkaaga ama deegaankaaga.

HALKEE MACLUUMAADKAYGA TALLAALKA LAGU KAYDIN DOONAA?

Bixiyaha tallaalku wuxuu galin karaa macluumaadkaaga tallaalka Nidaamka Macluumaadka Tallaalka (Immunization Information System (IIS)) ee gobol/deegaankaaga ama nidaam kale oo loogu talagalay. Tani waxay hubin inaad hesho isla tallaalkii hore markii aad marqaadashada labaad u soo laabato. Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan IISs booqo: <https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

WAA MAXAY COUNTERMEASURES INJURY COMPENSATION PROGRAM?

Countermeasures Injury Compensation Program (CICP) waa barnaamij fadaraal kaasi oo gacan ka gaysan kara bixinta kharashka daryeelka caafimaad iyo kharashyo kale oo gaar ah ee dadka qaar sida halista ugu dhaawacmay qaar kamid ah daawooyinka ama tallaalka, oo uu kamid yahay tallaalkani. Guud ahaan, waa in dacwad loo gudbiyo CICP hal (1) sano gudihii laga bilaabo taariikhda qaadashada tallaalka. Si aad wax badan uga ogaato barnaamijkan, booqo www.hrsa.gov/cicp/ ama wac 1-855-266-2427.

WAA MAXAY ISTICMAALKA XAALADDA GURMADKA AH (EUA)?

Maamulka Cuntada iyo Daawada ee Maraykanku wuxuu diyaariyey Tallaalka COVID-19 in lagu heli karo qorshaha helitaanka xaaladda gurmada oo loo yaqaan EUA. EUA waxa taageeray baaqa Xoghayaha Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha ee ah in duruufaha jiraa

ay cudurdaar u sameeyaan isticmaalka xaaladda gurmada ah ee daawada iyo dawooyinka bayolojiyeed inta lagu jiro aafada COVID-19.

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ma marin dib-u-eegid la mid ah ta ay mareen dawooyinka FDA ansixisay ama baadhay. FDA waxay bixin kartaa EUA marka shuruudaha qaar la buuxiyo, oo ay kamid yihiin inayna jirin badiilo ku filan, la ansixiyey, oo la heli karo. Sidoo kale, go'aanka FDA wuxuu kusalaysan yahay israaca caddayn sayniseed oo jirta taasi oo muujinaysa in waxsoosaarku laga yaabo inuu wax ka taro COVID-19 inta lagu jiro aafada COVID-19 iyo in faa'idooyinka la ogyahay iyo kuwa iman kara ee dawady ay ka badan tahay halisaha la ogyahay iyo kuwa iman kara ee dawada. Dhammaan shuruudahan waa in la buuxiyo si loo oggolaado dawada in loo isticmaalo daawaynta bukaanada inta lagu jiro aafada COVID-19.

EUA-da Tallaalka COVID-19 wuxuu shaqaynayaa muddada lagu jiro baaqa EUA COVID-19 ee cudurdaarka u samaynaya isticmaalka xaaladda gurmada ah ee dawadan, ilaa la joojiyo ama laga laabto moojee (taasi oo intaa wixii ka dambeeya aan la isticmaali karin).



Waxa soosaaray
Pfizer Inc., New York, NY 10017

BIONTECH

Waxa loo soosaaray
BioNTech Manufacturing GmbH An
der Goldgrube 12
55131 Mainz, Germany

LAB-1451-1.1

Dib loo eegay: Diisambar 2020